

Ku: _____

Cinwaanka: _____

OGAYSIIS AH INAAD AFAR IYO TOBAN MAALMOOD KIRADA KU BIXISO AMA KA GUURTO DHISMAHA

Waxaad helaya ogaysiiska halkan ku lifaaqan sababta oo ah kireeyaha gurigaagu wuxuu kugu eedeeyay in aanad raacaynin sharciyadii heshiiska kirada adigoo ku guul-dareystay inaad bixiso kirada ama yutiilitiga ama/iyo kharashaadka joogtada ah ama soo noqnoqda ee waqtigoodii dhaafay.

- (1) Kirada Billaha ee waajibtay
(liiska bilaha(sha)): \$ (qaddarka lacagta oo Doolar ah)
IYO/AMA
- (2) Yutiilatiga waajibtay
(liiska bilaha(bisha)): \$ (qaddarka lacagta oo Doolar ah)
IYO/AMA
- (3) Kharashaadka kale ee soo noqnoqda ama
mudada leh ee lagu qeexay heshiiska
kirada (liiska bilaha(bisha)): \$ (qaddarka lacagta oo Doolar ah)
WADARTA QADDARKA WAAJIBAY: \$ (qaddarka lacaga oo Doolar ah)

Ogoow - lacag bixinta waa in ay ahaato mid lacag caddaan ah, jeeg khasnaji bixiyo, lacagta daabacan ee bangiga bixiyo, ama maalgelin la tasdiiqiyay iyadoo la raacayo shuruudaha heshiiska kirada.

Waa inaad ku bixisaa dhammaan lacagta uu kireeyahaagu kugu leeyahay gudaha afar iyo toban (14) maalmood oo bilaabanayo markaad hesho ogeysiiskan ama waa inaad ka baxdaa dhismaha. Lacag kasta oo aad siisid kireeyaha waa in marka hore ay buuxisaa qaddarka guud ee lagugu leeyahay sida ku cad ogeysiiskan. Haddii aad ku guuldareeysato inaad u hogaansanto ogeysiiskan gudaha muddo afar iyo toban (14) maalmood oo bilaabanayo markaad hesho ogeysiiskan taasi waxay keeni kartaa dacwad maxkamadeed oo horseedo in guriga lagaa saaro.

Xafiiska Qareenka Guud ee Gobolka Washington ayaa wuxuu bogiisa interneetka ku hayaa ogaysiiskan oo ku qoran luuqado badan. Waxaad sidoo kale halkaas ka heli doontaa macluumaad ku saabsan sida loo helo qareen ama looyar kuugu shaqeeya qiimo yar ama kharash la'aan iyo ilo kasta oo la heli kara oo kaa caawinayo bixinta kiradaada. Haddii kale, wac 2-1-1 si aad wax uga ogaatid adeegyadaas.

Sharciga gobolka ayaa xaq kuu siinaya inaad ku heli karto adeegyada turjumaanka maxkamada.

MULKIILE/KIREEYAHA GURIGA: _____

TAARIKHDA: _____

HALKA LAGU BIXINAYO WADARTA LACAGTA
EE WAAJIBTAY IN LA BIXIYO:

Magaca mulkiilaha/kireeyaha guriga

Cinwaanka